

# Qaanuunka qaadashada dugsiga sare

SOMSLISKA

utbildningsinfo.se

Skolverket

Maxaa loo baahanyahay bilaabitaanka barnaamujka dugsiga sare?

*Si loo bilaabi karo barnaamuj qarameed ee dugsiga sare waxaa laga rabaa:*

- in aad dhameystirtay fasalka 9:aad ee dugsiga aasaasiga ah ama waxbarasho u dhiganta
- in aadan horay u dhiganin waxbarasho dugsiga sare
- in aad bilaabeyso waxbarashada ugu dambeyn lixda bilood oo ugu horeysa oo aad buuxineysid 20 sano

Si aad u qalmatid barnaamuj xirfadeed waxaa loo baahanyahay shahaado in lagu baasay maadada iswiidhishka ama iswiidhishka oo luuqadda labaad ah, ingiriiska iyo xisaabta iyo ugu yaraan shan maadooyin oo kale ee dugsiga aasaasiga ah.

U qalmidda barnaamuj diyaaris u ah jaamacadda waxaa loo baahanyahay shahaado in lagu baasay iswiidhishka ama iswiidhishka oo luuqadda labaad ah, ingiriiska, xisaabta iyo ugu yaraan sagaal maadooyin oo kale ee dugsiga aasaasiga ah.

U qalmidda barnaamujka dhaqaalaha- iyo cilmiga barashada mujtamaca iyo barnaamujka waxbarashada aadaamaha waxaa loo baahanyahay in afar ka mid ah sagaalkii maadooyin ahaadaan juquraafi, taariikh, cilmiga barashada mujtamaca iyo diin.

U qalmidda barnaamujka cilmiga sayniska- iyo barnaamujka farsamaha waa in sadex ka mid ah sagaalkii maadooyin ahaadaan bayoolaji, fiisigis iyo kiimistari.

U qalmidda barnaamujka fanniga leh sagaalka maadooyin si xor leh baa loo dooran karaa. Halkaan laakiin waxaa dhici karto in imtixaan awooda waxqabadka ah la iska qaado.

U qalmidda nooc khaas ah waxaa dhici karto in ay jiraan shuruudo ah in horay loo soo dhigtay maadada ama maadooyinka oo lagu garanayo barnaamujka nooca ah.

Sidaan baad u xisaabineysaa tiro-qiimeedkaada

Waxbarashadaha caanka ah badanaa dad ka badan boosaska barnaamujku leeyahay baa dalbado. Iskoolku markaas wuxuu sameynayaa xulasho. Dadka tiro-qiimeedkoodu ugu badanyahay baa markaa soo galayo barnaamujka. Tiro-qiimeedku waa isku geynta tirada 16:ka maadooyin oo ugu fiican shahaadadoodu. Waxbarashadaha leh imtixaanka awooda waxqabadka sidoo kale waa la tirinayaa dhibcihiisa.

*Tiro-qiimeedka shahaadada qofka ka baxayo dugsiga aasaasiga ah guga 2011 waa:*

MVG = 20      VG = 15      G = 10

*Tiro-qiimeedka shahaadada qofka ka baxayo dugsiga aasaasiga ah laga bilaabo guga 2013 waa:*

A = 20      B = 17,5      C = 15  
D = 12,5      E = 10      F = 0 (taas oo laga wado: ma baasin)

Tiro-qiimeedka shahaadada maadooyinka kooxda ah, tusaale ahaan NO (fisigis, kiimistari iyo baayoolaji), waxaa la heli karaa haddii la isku dhifto maadooyinka kooxda ah qiimahooda iyo inta maadooyin oo ka mid ah kooxdaas. Tirada shahaadada maadooyinka kooxda ah lama dhiibi doono laga bilaabo sannad dugsiiyeedka 2012/13. Shahaadada ugu badan oo la heli karo ama tirada qiimaha, oo loo yaqaano, waa 320 dhibcood.

Laga bilaabo qaadashada sannad dugsiiyeedka 2014/15 qofkii dhigtay luuqad casri ah ee luuqadaha la doora karo, qofkaasi waa uu ku darsan karaa shahaadada qiimahaas oo dheeraad ahaan ah marka loo eego 16 maadooyin oo ugu fiican. Tiro-qiimeedka shahaadada ugu badan markaas waxay noqon doontaa 340 dhibcood.